


Ka daawo Tooska: DSTV YouTube facebook LIVE

## Su'aalaha Badanaa La isweydiiyo (FAQ) – Qoyska

*Su'aalaha Marwalba Lisweydiiyo*

**Halkee ayaan ka heli karaa jadwalka qalinjabinta Degmada?** Dugsiga Degmada Gobolka wuxuu qabanayaa 23 ka mid ah 24 xafladood ee qalinjabin Maajo 11-19, 2024 goobta Xarunta Kulanka Gobolka GA ee ku taalo Xarunta Kulanka Gobolka Georgia, 455 Capitol Avenue, SE, Atlanta, GA 30312. Dugsiga Sare Margaret Harris waxay qabanayaan qalinjabintooda Jimcaha, Maajo 10, 2024 ee dugsiga. Jadwalka qalinjabinta waxaa la soo dhigaa websaydka Dugsiga Degmada DeKalb. Waxaad ka booqan kartaa bogga adoo isticmaalayo linkiga xiggo: https://www.dekalbschoolsga.org/graduation

**Miyaa gaadiid la siinayaa ardayda?** Haa. Basaska gaarka ah ee mukeefka leh ayaa la siiyaa dhammaan dugsiyada oo adeega safarka sii socodka iyo soo socodka ee aado/kana yimaado Xarunta Kulanka Gobolka GA. **Ma jiraan wax qidmad ah ee ardayda ay ku raacaan basaska gaarka ah.** Maamulayaasha waxay siinayaan qalinjabiye walba Foomka Ogolaanshaha Gaadiidka ee loogu tallogalay waaladiinta si ay u dhameystiraan oo ay ku soo celiyaan iyagoo tilmaamayo haddii ardaygooda uu raacayo ama aysan raaceyn baska gaarka ah ee ku socdo/ka imaanayo Xarunta Kulanka Gobolka GA. Maamulayaasha waxay wadaagayaan waqtiyada gaadiidka qaadista iyo soo dajinta waaladiinta/qalinjabiyayaasha. Daryeelaha dugsiga ayaa la raacayo baska qalinjabiyayaasha.

**Saacadee ayaa qalinjabiyayaasha la filayaa inay yimaadaan Xarunta Kulanka Gobolka GA?** Qalainjabiyayaasha waxaa la geynayaa xarunta Kulanka hal saac ka hor waqtiga bilowga jadwaleysan ee xaflladooda ee diyaarinada qalinjabinta. Basaska jaatarka ayaa dib ugu soo celinayo dugsiga islamarkiiba xaflada kadib.

**Goorma ayay xubnaha waaladiinta/qoyska u imaanayaan xaflada qalinjabinta ardayda?** Qeybaha baakinka ee Xarunta Kulanka Gobolka GA waxaa la furayaa hal saac ka hor waqtiga bilowga loo jadwaleeyay oo xaflad walboo qalinjabin ah. **Martida ka qeybgaleyso xaflada waxay galayaan oo ay ka baxayaan dhinaca sanduuqa tikidhada kaliya -- oo ku yaalo Capitol Avenue (*FIIRI QARIIRADA KU LIFAAQAN*)**.. *Fadlan isticmaal qariirada ku lifaaqan xarunta Kulanka si aad u qorsheysid booqashadaada.*

**Ma inaan baxsadaa lacagta baakinka?** Ma **jiraan qidmada baakinka** iyadoo ***la isticmaalayo waxyaabo badan oo hoos ku qoran*** ee taariiqaha gaarka ah ee qoran.

**Maajo 11** – Baluu, Cagaar, Summerhill B & C

**Maajo 14** – Baluu, Cagaar, Summerhill C

**Maajo 15** – Baluu, Cagaar, Summerhill C

**Maajo 16** – Baluu, Cagaar, Summerhill C

**Maajo 19** – Baluu, Cagaar, Summerhill B & C

**BAAKINKA ADA**

*Waxaa lagu heli karaa Qeyb Walba*

SI KASTABA, CAAWINTA GAARIGA GOOLOFKA WAXAA
**KALIYA** LAGA HELAYAA QEYBAHA XIGGO:

**1) QEYBTA BALUUGA AH**
**2) SUMMERHILL C LOT**

**Miyay tikidhada u baahanyihiin inay galaan xaflada qalinjabinta? Miyaa kursi la boos celiyay laga heli karaa xafladda qalin-jabinta?** Haa, tikidhada waxaa looga baahanyahay inay galaan xafladaha qalinjabinta. Korsiga waxaa loo boos celiyaa martida qalinjabiyayaasha heerka koowaad iyo heerka labaad. Imaanshaha daahsan waxay saameyneysaa gelitaanka Xarunta Kulanka Gobolka GA.

**Halkee ayaan kula kulmaa ardaygeyga xaflada qalinjabinta markay dhammaatay kadib?** Qalinjabiyayaasha ayaa waxay uga nasanayaan Xarunta Kulanka Gobolka GA si ay uga baxaan xarunta. Martida waxay ka baxayaan dhinaca sanduuqyada tikidkada. Haddii ardaygaaga qorsheynayo inay raacaan baska gaarka ah si ay ugu laabtaan dugsigooda sare, waxay si toos ah u aadayaan baska si ay islamarkiiba uga tagaan goobta xaflada kadib. Haddii qorshooyinka qalinjabintaada ay guriga kula aadeyso, fadlan weydii qalinjabiyahaaga inuu kugula kulmo albaabka oo Capitol Avenue oo xili u qorsheeya sida waafaqsan **(Fiiri Qariirada ku Lifaaqan).**




Ka daawo Tooska: DSTV YouTube facebook LIVE

## FAQ – Qoyska sii socoto

*Su'aalaha Marwalba Lisweydiiyo*

**Goorma ayay qalinjabiyayaasha helayaan dibloomadooda?**
Qalinjabiyaayasha waxay ku helayaan galalka dibloomada xaflada. Dugsi walboo sare wuxuu u qoondeeyay taariiq iyo saacad qalinjabiyayaasha si ay uga soo saaraan dibloomadooda dugsigooda. Dugsiyada waxay ku bixinayaan warbixin dheeraad ah xaflada ka hor.

**Miyaan helayaan fursada aan sawiro uga qaado qalinjabiyaheyga isagoo masraxa taagan?**
Maya. Ibiye sawir qaade lala soo heshiiyay ayaa qaadayo sawiro taxana ah oo qalinjabiye walba si loogu soo xasuusiyo dhacdadaan gaarka ah. Qalinjabiyayaasha waxay helayaan sawir nafsadooda ah oo ku qaadashada galka dibloomadooda masraxa sida ka qeyb ah xirmadooda qalinjabinta. Ibiyaha sawir qaadaha wuxuu la wadaagayaa sawirada dheeraadka ah ee qalinjabiyayaasha dugsiyada/qalinjabiyayaasha oo loo helayo ibsi.

**Muxuu qalinjabiyaheyga u baahanyahay inuu la imaado goobta?**
Qalinjabiyayaasha iyo martida waa inay xirtaan kabo raaxo leh iyo safar fudud. Degmada waxay sameyneysaa afar illaa shan xaflado qalinjabin maalin walba. Qolka tababarashada ee loogu tallogalay qalinjabiyayaasha xarunta waa in la faarujiyaa oo la nadiifiyaa islamarkiiba kadib markii ay ka qeybgalayaasha ka baxaan aaga si markaas loogu diyaariyo xaflada xigta. Qalinjabiyayaasha waa inay ku galaan hoolka xaflada alaabo la’aan iyo daroogada aan degmada laga ansixin sida medallions, honor cords, ribbons iwm. Qalinjabiyayaasha waa inay ku xirtaan kabo raaxo leh goobta oo sababaha badqabka ah. Ka qeybgalayaasha waxaa loo ogolyahay kaliya inay la yimaadaan baagag cad xarunta.

**Miyaa cunto laga ogolyahay goobta?**
Maya. Cuntada lagama ogola aaga. Qalinjabiyayaasha iyo martida waxaa la weydiiyaa inay cunnaan cunto ka hor xafladooda qalinjabinta. Qalinjabiyayaasha iyo martida ayaa sidoo kale la weydiiyay inay hubiyaan inay biyo badan cabaan inta ay ka qeybgalayaan xafladaha.

**Miyaa la duubaa xafladaha qalinjabinta?**
Haa. Xaflad walboo qalinjabin ah waa la duubayaa oo waxaana si toos ah looga siideynayaa linkiga daawashada. Linkiyada aad ka fiirin

kartid xafladaha waxaa lagu bixinyaa websaydka Grad Central Station: https://www.dekalbschoolsga.org/graduation/ Waxaa jiro

suurtogal ah in ka qeybgalayaasha laga yaabo in la sawiro, lagu duubo fiidiyow ama maqal inta lagu jiro duubista xafladaha.
Qalinjabiyayaasha waxay ka dajisan karaan koobiyada xafladahooda dhinaca YouTube.

**Warbixintee dheeraadka ah ayaad wadaagi kartaa aniga oo qorsheynayo booqashadeyda?**

- Qorsheynta xili hore oo imaanshaha hore waa muhiim. *Fadlan isticmaal qariirada ku lifaaqan si aad u qorsheysid booqashadaada.*
- **Fillo socod dheer oo aad kaga imaaneysid qeybta baakinka -- xiro kabo raaxo leh.**
- **Fadhiisidka hoolka aad ayay u dheertahay. Fadlan ku dhaqan taxadar.**
- Dhammaan mobeelada/aaladaha korontada waa inay aamusnaadaan ka hor soo gelitaanka hoolka.
- **Buufino, qeylo sameeyayaasha, aastaamo, boorso, boorsada dhabarka, iwm**. lagama ogola hoolka. ***Fadlan fiiri warqada ku lifaaqan***.
- Martida ka qeybgaleyso xaflada waxay ka galeysaa oo ay ka baxeysaa dhinaca sanduuqyada tikidka ee ku yaalo Capitol Avenue.
- Gaariyada naafada waa looga helayaa aaga ka qeybqalayaasha u baahdo. Ka qeybgalayaasha dhaqaaqa xadidan ee aan u baahneyn caawinta gaariga naafada way u suurtogaleysaa inay ku soo galaan hoolka socodka oo heerarka fadhiga.
- Martida qalinjibiyaha heerka koowaad iyo heerka labaad waxay fadhineysaa meel u dhow heerka dhulka ee u dhow

  qalinjabiyayaasha.
- Martida waa inay ku soo galaan hoolka baagag banaan kaliya. U qorshey sida waafaqsan cimilada xun.
- Fadhiga wuu xadidanyahay. **Hasoo iloobin tikidkaaga.** Tikidhada waxaa looga baahanyahay in lagu galo hoolka.
- FARIINTA DEGDEGA AH EE LOOGU TALLOOGALAY QALINJABIYAYAASHA IYO MARTIDA: Dhammaan ka qeybgalayaasha waxaa looga baahanayaa inay ka galaan dhinaca Aaladaha Ogaanshaha Hubka.




# Xarunta Kulanka Gobolka Georgia

Ka daawo Tooska: DSTV YouTube facebook LIVE







## **Xeerka Baagada Banaan**

Martida waxaa looga baahanyahay inay qaadaan baagag banaan oo ay ku haystaan alaabahooda oo aan ka weyneyn 12” X 6” X 12”, baagada qaboojiyaha bacda 1-ka galoon ah, iyo/ama Ulaha aanan ka weyneyn 4.5” X 6.5”, qiyaastii cabirka gacanta.

Baagadaha ka weyn 12” X 6” X 12” iyo dhammaan boorsooyinka dhabarka waa ka mamnuuc Xarunta Kulanka GSU. Ka reebid ayaa loo sameynayaa kuwa qabo sharuudaha caafimaadka, baagadaha xafaayada ama baahiyaha gaarka ah.

Dhammaan boorsooyinka waxay quseeyaan baaris. Martida waxaa lagu dhiirogelinayaa inay ku celiyaan boorsooyinka aanan la ansixin baabuurtooda. Jaamacada Gobolka Georgia MA bixineyso saldhiga baarista baagada oo illaalsan oo laga kormeero si ay ugu ogolaato taageerayaasha inay kala soo galaan baagadaha oo ay kala baxaan inta lagu jiro munaasabada.

Ka qeybgalayaasha waxay ka soo galayaan dhinaca aaladaha hubka baaro.

## Qaabilaadaha Xeerka Ameerikaanka Curyaanka ah (ADA):

Fadhiga ADA waxaa laga helayaa **dusha sare ee qeybaha 100 heer.** Laga soo bilaabo plaza iyo hoolka ma jiraan wax jaranjarooyin wadada kuraastaan ah. **Fadhiga/baakinka ADA wuu xadidanyahay oo waxaa lagu helayaa si ku saleysan qofkii soo hormaro.**

**Sheeyada Mamnuucan:** Wixii badqabka ka qeybgalayaasha, sheeyada xiggo iyo howlaha waa ka mamnuuc Xarunta Kulanka:

**Qeylo suubiyayaasha macmalka, xayawaanada, boorsada dhabarka, cuntada iyo cabitaanka ka baxsan, shaqooyinka dabka, buufisyada, baskiilada, iskeetboorka, iskuutaas iyo roolbaleedhs, qaboojiyayaasha, walxaha sharci darada ah, qalabka leesarka, ulaha calanka iyo istiikarada, gaariyada carruurta, kaamirooyinka muuqaalka, hubka, calaamadaha weyn.** Dhammaan mobeelada/aaladaha korontada waa inay aamusnaadaan ka hor soo gelitaanka hoolka.

# XARUNTA KULANKA GOBOLKA GEORGIA
455 CAPITOL AVENUE, SE
ATLANTA, GA 30312

*Fadlan Ogow*:

**Ma jiraan qidmada baakinka. Waxaan isticmaaleynaa qeybaha xiggo maalin walba:**

**Maajo 11** – Baluu, Cagaar, Summerhill B & C
**Maajo 14** – Baluu, Cagaar, Summerhill C
**Maajo 15** – Baluu, Cagaar, Summerhill C
**Maajo 16** – Baluu, Cagaar, Summerhill C
**Maajo 19** – Baluu, Cagaar, Summerhill B & C

## BAAKINKA ADA

*Waxaa lagu heli karaa Qeyb Walba*

SI KASTABA, CAAWINTA GAARIGA GOOLOFKA WAXAA LAGA HELAYAA QEYBAHA XIGGO:

1) QEYBTA BALUUGA
2) SUMMERHILL C LOTS

**MARTA**

Saldhiga Marta ugu dhow waa Saldhiga Gobolka Georgia ee 170 Piedmont Ave SE, Atlanta, GA 30303, qiyaastii. 7 mayl ka baxsan Xarunta Kulanka.

